

Xarumaha Ka Soo Kabsiga Musiibada ee ka Furan Yahiiin Rutland iyo Washington

Release Date: Luulyo 21, 2023

WILLISTON, VT – Luulyo 22, saacadda marka ay tahay 8 a.m., dagmooyinka Rutland iyo Washington, waxaa laga furi doonaa labo ka mid ah Xarumaha Ka Soo Kabsiga Musiibada (Disaster Recovery Centers) si loo kaalmeeyo dadka daggan ay saameeyeen duufaanaada darran, fattahaadda, dhul guurka iyo carro guurka si ay si degdeg ah u soo kabsadaan. Wadajirka gobolka-xarumaha FEMA waa hay'ado ku meel gaar ah oo kuwa badbaaday ku kaalmeyn doonto in ay dalbadan kaalmada FEMA, raaciyaan arjigooda warqadaha looga baahan yahay kaddibna qof ahaan jawaab jawaab ka bixiyaan su'aalaha.

Xarunta Dagmada Rutland waxay ku taal:

ASA Bloomer Building
88 Merchants Row
Rutland, VT 05701

Xarunta Dagmada Washington waxay ku taal:

Waterbury Armory
294 Armory Drive
Waterbury, VT 05676

Saacadaha: 8 a.m. ilaa 7 p.m., todobo maalin todobadkii.

Xarumaha waxay u fudud yahiin dadka itaalka darran iyo kuwa u baahan in laga taageero gelitaanka iyo kuwa itaalka darran ee ku qalabeysan farsamada taakuleynta. Dadka ka badbaada ee u baahan fududeyn macquul ah ama turjubaanka luqadda calaamadda waxay wici karaan 833-285-7448 (riix 2 si aad u heshid luqadda Isbanish).

Xarumaha waxaa kaloo laga heli doonaa wakiilo ka socda Maamulka Ganacsiyada Yaryar ee Mareykanka (U.S. Small Business Administration) oo



FEMA

Page 1 of 2

sharaxaad ka bixiya sida loo dalbado deynta musiibada korsaarka yar ee la siiyo milkiileyaasha guriga, kireysteyaasha, ganacsatada, iyo kuwa gaarka loo leeyaha kuwa aan doonin fa'iido, kaddibna waxay bixiyaan macluumaad ku saabsan dib u dhiska si guryaha looga dhigo kuwo u adkeysta musiibada.

Ma u baahnid in aad soo booqatid xarunta dib u kabsiga si aad u dalbatid kaalmada FEMA. Si aad u dalbatid adigoo aan soo booqanin xarunta, wac Khadka Kaalmada FEMA (FEMA Helpline) ee lagala xariiro 800-621-3362 inta u dhexeyso 7 a.m. iyo 11 p.m. Saacadda Bariga (ET); waxaad kala xariiri kartaa bogga internetka DisasterAssistance.gov; ama soo dagso [FEMA App](#). Haddii aad isticmaashid adeegga lalliska sida adeegga lalliska fiidiyowga (VRS), adeegga telefoonka la raaciyo qoraalka ama wax kale, waxaad FEMA siisaa nambarkaada adeeggaas marka aad dalbatid.

Si aad u heshid macluumaadka ugu dambeeyo ee ku saabsan dib u kabidda Vermont, fadlan booqo fema.gov/disaster/4720. La soco xisaabta FEMA Gobolka 1aad ee laga helo Twitterka twitter.com/FEMARegion1, bogga Faceboogga FEMA ee laga helo facebook.com/FEMA, ama Wakaaladda Maamulka Degdegga Vermont (Vermont Emergency Management Agency) ee laga helo Twitterka twitter.com/vemt iyo laga helo Faceboogga facebook.com/vermontemergencymanagement.



FEMA

Page 2 of 2